



Maxaa gudaha ku qoran...

Habka Arjiga.....	1
Mudnaanta Diiwaangelinta	2
Barnaamijka Magnet.....	3
Dugsiyada Magnet.....	9
Barnaamijka Isbeddelka Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah (VEEP)	22
Barnaamijka Diiwaangelinta Furan/ Nidaamka qaadashada ardeyda dugsiyada kale	23
Doorashada Dugsiyada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan (PISC) ...	29
Fursadaha Kale.....	31
Gelitaanka Dugsiyada Degmada dhexdeeda ku yaala	33
Arjiga Doorashada Dugsiga.....	34
Dugsiyada Gaarka ah (Charter).....	36

Qof kasta waxaa uu leeyahay dugsi deegaankiisa ku yaal, laakiin mararka qaarkood waalidiinta iyo qoysasku waxay rabaan doorashada dugsiga....

SCHOOL
CHOICE
ENROLLMENT OPTIONS

Barnaamijka Magnet

Wuxuu ardeyda u fidiyaa dugsiyo heer sare ah oo si khaas ah oo qoto dheer loogu baraneyo maaddooyinka Magnet, taas oo heerarka manhajka ku salleysan; ardeyda gaadiid waa la siineyaa

Qoraalada buuggan ku qoran waxaa qeyb ka mid ah lagu sameeyey deeq lacageed oo laga helay Waaxda Waxbarashadda ee Maraykanka. Hase ahaatee, qoraaladu kama turjumayaan siyaasada Waaxda Waxbarashadda ee Maraykanka, waana inaan loo qaadanin inay Dawladda-dhexe ansaxisay.

Waxaa mahadcelineyaa Mission Federal Credit Union adeegyada ay bixiyeen ee Paul Body Photography.

Madaxa Waxbarashaddu farriin uu Waalidiinta u gudbineyo



Terry B. Grier, Ed.D.
Madaxa Waxbarashadda

Xafiiska Madaxa Waxbarashadda

Dugsiyada Middoobey ee Degmada San Diego waxaa sharaf u ah in ardeyda iyo waalidiinta magaalada ku nool u fidiyaan doorashooyinka diiwaangelinta oo kala duwan. Boggagan soo socda waxaad ka heli doontaan warbixin ku saabsan barnaamijyada xiisaha leh ee ay heli karaan ardeyda deggan xuduudaha degmada ee raba inay galaan dugsi aan ahayn ka deegaankooda ku yaala.

Waxaan idin kula talineynaa inaad akhridaan buuggan-warbixineed oo dhan si aad u ogaataan fursadaha waxbarasho ee ay degmadu bixiso. Marka aad u diyaar garowdo inaad dalbatid dugsi aan ahayn kan deegaankaaga ku yaala, waxaad si dhammeystirran u buuxisaa arjiga Doorashada Dugsiga eek u yaal buuggan-warbixineed xagiisa dambe.

Barnaamijka kasta oo ku yaal buugga-warbixineed wuxuu taageeraya dadaalka waxbarashadda degmada ee ah inay ardeydeennu mustaqbalka guul ka gaadhaan kullleejada iyo shaqada xirfadaha lagu shaqeeyo. Iska diiwaangelinta barnaamijyadanu waxay u furan tahay dhammaan ardeyda degmada ku nool, kuwaas oo ay ku jiraan Ardeyda Af Ingiriisiga Baraneysa, Ardeyda Kartida iyo Hibada Waxbarashadda loo siiyey (GATE) iyo ardeyda Baahida Khaaska ah leh ama curyaamiinta ah. Kumaankum ardey ah ayaa barnaamijyadan ka faa'iideysatay, isla mar ahaantaasna, diiwaangelintu wey xadidan tahay. Sidaas darteed, waxaa la idiin ka baahan yahay inaan buuggan-warbixineed akhridaan, kedibna aad soo dalbataan inta ka horeysa bisha Febraayo 15 keeda oo ah maalinta ugu dambeysa ee araaajida la qabaneyo.

2009-2010

Guddiga Waxbarashadda:

Richard Barrera
John de Beck
John Lee Evans
Shelia Jackson
Katherine Nakamura

Si Daacadnimo ah,

Terry B. Grier, Ed.D., Madaxa Waxbarashadda

Barnaamijka Isbeddelka Isdiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah (VEEP)

Wuxuu ardeyda u fidiyaa gaadiid si uu ugu dhiirrigeliyo ardeyda ka tirsan jaaliyada inay galaan dugsiyada kale ee jiiraankooda ka baxsan

Barnaamijka Diiwaangelinta Furan

Wuxuu ardeyda u oggolaneyaa inay galaan dugsi kasta oo degmada dhexdeeda ku yaal (oo aan ka ahayn dugsiyada barnaamijka Magnet), laakiin wax gaadiid ah lama siin doono

Doorashada Dugsiyada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan (PISC)

Wuxuu waalidiinta ay ardeydoodu ku jiraan Dugsiyada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan (PISC) u oggolaaneyaa inay soo codsadaan in loo beddelo dugsi loo qoondeeyey oo ah Dugsiyada aan Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahneyn ee deegaanka ardeyga; gaadiidna waa la siin doonaa

Fursadaha Kale

Waxbarashadda degmadu waxay bixineysaa barnaamijyo kale oo ah fasalada Xanaanada ilaa iyo 12aad si baahida radeyda loo daboolo

Dugsiyada Gaarka ah (Charter)

Dugsiyada guud waxay bixiyaan fursado waxbarasho oo tayo sare leh, kuwaas oo si madax bannaan u hawlgala, laakiin masuuliyada dheeraad ah la saareyo

**Wakhtiyada iyo nidaamka
arjigu wuu Isbeddelay!**

Bisha Febraayo 15 keeda ayaa ah maalinta ugu dambeysa ee qoysaska hada degmada ka diiwaangashan ay soo dalban karaan Doorashooyinka Dugsiyada

Sannadkan wuu cusub yahay...